



BATH & BODY WORKS SIYAASADDA KAHORTAGTA AARGOOSIGA

HORDHAC

Bath & Body Works (oo ah “Shirkadda”) waxaa ka go’an inay ilaaliso dhammaan danwadaagteeda iyo dadka kale ee u qabta shaqo ama adeegyo Shirkadda kuwaasoo soo sheega anshaxa aan habboonayn ee aargoosiga. Dhammaan noocyada aargoosiga waa mamnuuc, oo ay ku jiraan nooc kasta oo edbin, aargoosi, cabsigelin, tallaabo shaqo oo xun ama khasaare taban oo xirfadeed ah oo sida macquulka ah ay u badan tahay inay qofka ka hor istaagto ka warbixinta anshax-darrada, ama nooc kale oo aargoosi ah oo ku lug leh ka qayb qaadashada hawl kasta oo uu dhowro sharciga.

Tusaalooyinka HAWLAHA SHARCIGU DHOWRO

Hoos waxaa ku yaala liiska aan dhammaystirnayn ee tusaalooyinka hawlaha sharcigu dhowro.

- Muujinta walaac ka dhex jira shirkadda (qoraal ama af ahaan) ee sheegaya eedeymaha ku xadgudubka Siyaasadda Faraxumaynta/Siyaasadda Kahortagta Takoorka ee shirkadda.
- U soo gudbinta cabasho takoor ama dhibaataayn Guddiga Fursadaha Shaqaalaynta ee Loo Wada Siman Yahay ee Maraykanka (“EEOC”), hay’ad dawladeed oo kahortagta takoorka, ama maxkamadda.
- Ka qayb qaadashada baaritaanka Bath & Body Works ee eedeymaha takoorka ama dhibaataaynta, oo ay ku jirto bixinta macluumaad ku saabsan warbixin ama baarista warbixinta.
- Taageerida cabashada gudaha shirkadda ama maamul ee danwadaag kale ee khuseysa takoor ama dhibaataayn (tusaale ahaan, marag-furka ama bixinta dhaar lagu taageerayo shaqo-wadaag cabasho takoor u soo gudbiyay EEOC ama hay’ad la mid ah oo kahortagta takoorka).

Shirkaddu uma dulqaadanayso nooc kasta oo aargoosi ah oo ka dhan ah hawl kasta oo sharcigu ilaaliyo. Danwadaagtu sidoo kale waa ka mamnuuc inay ka aargoostaan shaqsi sheegay inuu doonayo inuu walaac ka keeno iyadoo la raacayo Hagitaanka Ka Warbixinta Dhibaataaynta, Takoorka & Ka Aargoosiga ee Shirkadda.

KA WARBIXINTA AARGOOSIGA

Maamule kasta ama horjooge kasta, xitaa hadduu si kumeelgaar ah xilka u hayo, ee aaminsan inuu arkay aargoosi waa inuu soo sheegaa habdhaqanka. Haddii aad tahay saaxiib, iibiye, qandaraasle, ama lammaane kale oo ganacsi aadna aaminsan tahay in lagaa aargoosanayo ama aad aragtay aargoosi, fadlan gudbi warbixin. Fadlan guji [halkan](#) si aad u hesho Hagitaanka Ka Warbixinta Dhibaataaynta, Takoorka & Ka Aargoosiga ee Shirkadda, oo ay ku jiraan macluumaadka la xiriira hababka baarista iyo xallinta ee Shirkadda, ama kala xiriir Anshaxa Caalamiga ah & U Hoggaansanaanta Anshaxa barta ethicsandcompliance@bbw.com.

Shakhsiyaadka waxaa sidoo kale lagula talinayaa inay si degdeg ah u diiwaangeliyaan dhacdo kasta oo ku lug leh aargoosi.

KU XADGUDYADA SIYAASADDAN

Danwadaag kasta, iyadoo aan loo eegin jagada ama darajada uu hayo, ee shirkadu ay go’aamiso inuu ku hawlan yahay aargoosi xadgudub ku ah Siyaasaddan, ayaa lagu qaadi doonaa anshax-marin, oo ay ku jiraan joojinta suurtagalka ah iyo/ama ka joojinta iyo dib u bixinta lacagaha magdhowga ama baabi’inta waxyaabaha aan weli la helin.



ADEEGSIGA SIYAASADDAN

Waaxda Anshaxa Caalamiga ah & U Hoggaansanaanta Anshaxa ayaa mas'uul ka ah adeegsiga siyaasaddan. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan siyaasaddan ama su'aalo ku saabsan aargoosiga ee aan lagu xusin siyaasaddan, fadlan la xiriir Waaxda Anshaxa Caalamiga ah & U Hoggaansanaanta Anshaxa barta ethicsandcompliance@bbw.com.